

Waxa la soo saaray  
June 15, 2005

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha

Ka Soo

Shaacbaxaya

Gobollada

**FSAU waxay hay'ado kale la samayn doontaa Qiimaynta Guga Kadib ee Hubinta Cuntada, Nafaqada iyo Hab-nololeedka July 5-25. Natijada hordhaca ahi waxay diyaar noqon doontaa horraanta August (bogga 4).**

**Nabad la'aanta:** Xiisadda sii kordhaysa ee ka jirta Waqooyiga Gedo, Bay iyo Bakool waxay ku waddaa inay taabanayso helitaanka biyaha iyo daaqa waxana ay qastay howlaha beeraha ee socda. Xasilooni la'aantu waxa kale oo ay xaddidaysaa gaadhista goobahaas ee gargaarka bina-aadamnimada. Guuridda toddobaadkan ay Dawladda Ku Meel Gaadhka ah ee Federaaliga ahi u guurtay Soomaaliya waxa loo arkay tallaabo fiican oo keeni karta horumarin guud oo xasiloonida hab-nololeedka ah.

**Cimilada:** Roobabka Gugu (March - May 2005) ilaa hadda waxay u da'een si siman caadiga aad uga sarreeya badi Waqooyiga, badhtamaha iyo meelaha xoola-dhaqatada ee Jubbooyinka. Dhinaca kalena dhulka beeraha ee koonfurta, gaarahaan Shabeellada Hoose, roobabku waxay u da'een si aan sinnayn oo caadiga aad uga hoosaysa (bogga 2).

**Suuqyada:** Shilinka Soomaaliya iyo ka Soomaalilaand waxay ku wadaan inaanay isbedelin badi suuqyada. Celceliska sarrifka doolarka ee shilinka Soomaaliya (SOSH) wuxuu ahaa 15,390 sarrifka doolarka ee shilinka Soomaalilaand (SLSH) wuxuu ahaa 6,200 bishii May. Qiimaha badeecadda dibedda laga keenaa ismay bedelin bishii May marka laga reebo qiimaha baatoolka oo muujinaya inuu sii kordhayo dhowrkii bilood ee la soo dhaafay gobollada beeralayda ee dhulka hadhuudhku uu ka baxo, Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka. (Bogga 2).

**Nafaqo:** Heerarka wadarta nafaqa-darrada ee hadda ee dooxada Sool waxa la soo sheegay inay tahay 10-14.9% (dherarka oo loo eegay culayska qofka), taasoo ah heerka caadiga u ah degmadaas. Soo kabashada hubinta cuntada ee guud iyo gargaarka bina-aadamnimada ah ee sii socda ayaa ka mid ah sababaha keenay in xaaladda nafaqadu ay sidan tahay. Galgaduud iyo Gedo, heerarka wadarta nafaqadarrada ee hadda (oo ka sarreeya 20% dherarka oo loo eegay culayska qofka) waxay aad uga sarreeyaan sida caadiga u ah gobolladaas. Heerarka wadarta nafaqadarrada ee hadda ee Hobyo iyo Bakool iyaguna way ka sarreeyaan sida caadiga u ah (bogga 2).


**Beeraha:** Badhtamihii bishii May, beeraha ku hareeraysan Webiga Jubba daadad ayaa ku soo rogmaday laga billaabo koonfurta Gedo illaa Jammaame daadadkaas oo saameeyey 5-10 km labada dhinaca ee webiga islamarkaana xumeeyey qiyaastii 80-90% dalagga galayda. Shebeellooyinka roobabka Gugu illaa hadda waxaba kamay tarin soosaarka dalagga, sidaas darteed rajada laga qabo galayda roobka ku baxdaa way liidataa. Beeralayda webiga qarkiisa saarani waxay kordhiyeen waraabinta iyagoo ka faa'iidaystay heerka biyaha wabiga ee sarreeyey waxana ay ka hortageen inay daadad dhacaan. qiimaha galaydu aad ayuu u kordhay Jubbooyinka iyo Shabeellooyinkaba soosaarka galayda oo liitay Dayrtii la soo dhaafay iyo soosaarkii la filayay Guban oo liitay dartood. Saadaasha Dalagga ee 2005/06 guudahaan ma muujinayo faraag saadka dalagga ah, xitaa marka la maleeyo soosaarka dalaggu inuu caadi ka hooseeyo koonfurta (bogga 3).

**Xoolaha:** Roobab sida caadiga ah ka sarreeya oo ka da'ay dhulka xoola-dhaqatada ee waqooyiga iyo badhtamaha waxay ku wadaan inay hore u marinayaan xaaladda iyo soosaarka xoolaha. Berkadaha iyo ceelashu way buuxaan, daaqu u soo cusboonaaday, heerka dhalmada xooluhuna wuu sarreeyaa. Goobaha xoola-dhaqatada ee gobolada koonfurta iyo kuwa dhexe roobabka Guga ee day'ay kumay fillayn, hase yeeshee roobabkii Dayrta oo fiicanaa ayaa hubiyey in biyaha iyo daaqu ay ku fillaadaan, guudahaan xaaladda xooluhu waxa la sheegay inay fiicantahay (bogga 3).

**Arrimaha Ka Soo Shaacbaxaya Gobollada:** (bogga 4)

- **Daadad badan ayaa ku soo rogmaday Jubbooyinka Hoose iyo Dhexe laga billaabo badhtamihii May kadib roobab culus oo ka da'ay Itoobiya dartood. Waxana ay sii xumeeyeen Gurmada Bina-aadamnimada ee bulshooyinka webiga Jubba.** Saamaynta kale ee daadadka waxa ka mid ah saadka iyo helidda cuntada oo xaddidmay, qiimaha dalagga ee suuqyada oo si degdeg ah u sii kordhaya, cudarrada biyaha ka dhasha oo sii kordhay, fayadhowrka oo xumaaday iyo biyaha nadiifta ah oo yaraaday. Illaa hadda jawaabta bina-aadamnimadu way koobantahay. OCHA waxay qorshaynaysaa inay ka samayso goobaha ay daadadku saameeyeen qiimeyn degdeg ah oo ay hay'ado kala duwani ka qaybgalayaan.

- **Daadad ba'an ayaa ku soo rogmaday Wabiga Shabeelle Gobolka Hiran oo barakiciyey ama si xun u saameeyey qiyaastii 7,000 oo qoys.** Saamaynta daadadka waxa ka mid ah dadweynaha barakacay, tuulooyin go'doomay, waddooyinka ganacsiga oo xidhmay dalagga dhakhso lacagta looga helo oo ay waxyeello gaadhay, musuqulaha oo dumay, iyo ceelasha gacanta lagu qodo oo sumoobay. Jawaabta bina-aadamnimadu degdeg ayay ahayd laakiin kumay fullayn inay la kulanto dhammaan baahida. Dhowaan nabad la'aanta ka jirtay Beled Weyne waxay dib u dhigtay gargaarka bina-aadamnimadu inuu gaadho halkaas.



Wakhtiyada Xilliyada ee Soomaaliya & Dhacdooyinka Muhiimka ah

**Cinwaanka:**  
FSAU - Somalia  
Kalson Towers,  
Parklands

Box 1230 Village Market  
Nairobi, Kenya


Tilifoonka: +254 20 374 5734

Faakiska: +254 20 374 5098

Email: fsauinfo@fsau.or.ke

www.unsomaliamedia.net/fsau/

# Cimilada



Ilaa hadda roobabka xiliga Gugu (March-May 2005) si fiican ayay u da'een badi dhulka xoola-dhaqatada ee Gobollada dhexe iyo waqooyiga (Khariidadda 1). Hase-yeeshee roobab aan fiicnayn ayaa ka da'ay goobaha beeralayaada ee koonfurta.

Cabbirka Cagaarka Dhirta iyo falanqaynta roobka % qiyaasta mudada dheer (Map 2 and 3) Labaduba waxay xaqiijinayaan inay muuqato in xaaladdu caadi ay aad uga sarraysay degmooyinka dhexe, waqooyiga iyo dhulka xoola-dhaqatada ee Jubba. Dhinaca kale, goobaha beeraha muhiim u ah oo koonfurta gaarahaan Shabeellada Hoose waxa muuqata in xaaladdu ay sida caadiga ah aad uga hoosaysay.

Roobabku waxay keeneen in seeruhu ay hore u mareen dhammaan Soomaaliya, marka laga reebo Gedo, Bay, iyo Bakool (Map 3).

Maddaama roobabkan fiicani ay ka dambeeyeen roobabkii xilliga Deyrta ee caadiga ka sarreeyey, abaartii cimilada la xidhiidhay ee sannadaha badan ka jirtay gobollada dhexe iyo waqooyigu imika way dhammaatay.

Dhinaca kale, roobab caadi ka sarreeya oo ka da'ay Itoobiya (Khariidadda 1) waxay keeneen daadad ku fatahay labada dhinca ee webiyada Shabeelle and Jubba. Mudada gaaban, daadadku waxay barakiciyeen dad waxana ay xumeeyeen dalagii taagnaa. Hase yeeshee mudada dhexe qooyaanka ku hadha dhulka uu daadku ku soo fatahay wuxuu keeni doonaa fursado ah in wax lagu beero dhulka biyofadhiisinka ah.

Eeg Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, June 2005

## Nafaqo

Degmada Sool, wararka ka imanaya baraha lasocoda, baraha caafimaadka iyo meelo kale waxay muujinayaan in heerarka nafaqadarradu sidii caadiga degmadaas u ahayd, 10-14.9% (Dherarka oo loo eegay culayska qofka), ay yihiin. Soo kabashada hubinta cuntada ee guud iyo gargaaraka bina-aadamnimada ee sii socda ayaa ka mid ah sababaha keenay. Galgaduud iyo Gedo, heerarka Wadarta Nafaqa-darrada ee hadda taagan aad ayay sida caadiga ah, 20% (Dherarka oo loo eegay culayska qofka), uga sarreeyaan. Hobyo iyo Bakool wararka la hayaa waxay muujinayaan in heerka Wadarta Nafaqa-darradu uu ka sarreeyo sida caadiga ah, 10-14.9%, oo ay tahay 15-19.9% (dherarka oo loo eegay culayska qofka) siday u kala horreeyaan. Jubbooyinka nafaqadarradu way ka sarraysa sida caadiga ah oo ah 15% (dherarka oo loo eegay culayska qofka). Nabad la'aanta waxa weeye sababta u weyn ee keentay heerarka sare ee nafaqadarrada, sababtoo ah waxay dib u dhigtaan gargaaraka bina-aadamjnimada waxana ay ka hor istaagtaa qoysasku inay ku dhaqaaqaan howlahooda caadiga ah ee hubinta cuntada iyo dakhliga.

Eeg Warbixinta Nafaqada ee FSAU, May 2005.



suuqyada - cimilada - nafaqada

## Suuqyada

Shilinka Soomaaliya iyo ka Soomaalilaandba waxay ku wadaan inaanay isbedalin badi suuqyada waaweyn. Sarrifka Doolarka ee Shilinka Soomaaliya (SOSH) wuxuu ahaa celcelis ah 15,390 bishii in May (15,475 bishii April), sarrifka Doolarka ee Shilinka Soomaalilaandna (SLSH) celceliskiisu wuxuu ahaa 6,200 SL\$H/US\$ (6,300 SL\$H/US\$ in April). Qiimaha dalagga dibedda laga keenaa isna ismuu bedelin bishii May badi gobollada, marka laga reebo qiimaha baatrootka ama shiidaalka oo ay ka muuqato inuu sii kordhayay afartii bilood ee la soo dhaafay dhulka beeraha hadhuudhka Gobollada Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka.

Eeg Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET, June 2005.

Tusmada 1: Isbedelka Shilinka Soomaaliya iyo Soomaalilaand ee Suuqyada Muqdisho iyo Hargeysa, 2000 - hadda.



## Beeraha

Roobabka Guga ee ka da'ay Shabeellooyinka April-May umay di'in si fiican oo wax tar u leh soosaarka beeraha. Rajada laga qabay galayda roobka ku baxdaa way liidataa. Dhinaca kale, beeralaydu waxay kordhiyeen howlaha waraabinta beeraha ku dhow webiga taasoo ay fududaysay heerarka biyaha webiga ee korreeya. Waraabintan la sii kordhiyey waxay ka hortagtay daadadka Shabeellooyinka, hase-yeeshee, biyomareenno badan ciid ayaa gashay ama si fiican uma shaqaynayaan, taasoo gaadhsiinta biyaha ku koobtay meelaha webiga ku dhow.

Beeraha ku hareeraysan Webiga Jubba daadad ayaa ku soo rogmaday badhtamihii May laga billaabo Koonfurta Gedo illaa Jammaame. Dhul gaadhaya 5-10 km oo ah labada dhinac ee webiga ayuu daadku saameeyey waxana lagu qiyaasay in 80-90% galaydu ay si buuxda u xumaatay. Dhesheegii qallallaa ee xaaladoodu ay liidatay iminka way buuxsameen markii u horraysay taniyo fatahaadii El Nino ee 1997. Tani waxay keeni doontaa fursado wanaagsan oo ah beeritaanka dhulka biyo-fadhiisinka ah iyo kalluumaysiga oo kordha.

Dhulka hadhuudhku uu ka baxo, roobabka Gugu way ka hooseeyaan sida caadiga ah waanay koobnaayeen. Roobabku da'ay dabayaaqadii April way ku fillaayeen bixitaanka dalagga ee badi dhulka xoolo-iyo-beero-dhaqatada, hase yeeshee, roob la'aan jirtay dhowr iyo toban maalmood billowgii May waxana ay keeneen in dalagu uu qaadho. Guusha soosaarka hadhuudhku waxay ku xidhantahay inay da'aan roobab ku filani illaa June. Sida ay sheegayaan wararka ka imanaya guduhu beeralayda qaarkood diyaar uma aha inay beeraan hadhuudh sannadkan maaddaama hadhuudhkii fiicnaa ee go'ay kadib Deyrtii 2004/05 uu keenay in qiimaha hadhuudhku uu hoos u dhacay taasoo sababtay inaan faa'iido laga helin soosaarka dheeraadka ah.

Soosaarka dalagga ee goobaha xoolo-iyo-beero-dhaqatada ee gobolka Awdal iyo Galbeedka Gabiiley si fiican ayuu u baxayaa roobabka Guga oo caadi ka sarreeyey dartood. Galayda la beeray March/April way ubaxaysatay, galayda cagaarka ahna waxa la filayaan inay diyaar noqoto badhtamaha June, iyadoo goynta u weyn ee galaydu ay dhacayso July. Kadib roobabka wanaagsan, beeralaydu dhulkaasi waxay beerayaan hadhuudh, kaasoo loo isticmaalo caws iyo cuntaba. Goynta hadhuudhku waxa la filayaa inay dhacdo August/October.

Qiimaha galaydu aad ayuu kor ugu kacay 3-4tii bilood ee u dambeeyey goobaha ugu waaweyn soosaarka galayda ee koonfurta (Tusmada 2). Qiimuhu wuxuu kordhay in ka badan 50% Shabeellooyinka, Jubbooyinkana ilaa 80%. Qiimaha Galayda way kordhayaan sababtoo ah soo saarkii Deyrta 2004/05 oo hooseyey iyo soosaarkii la filayey 2005 oo liita. Sidoo kale, qiimaha galaydu wuxuu sii kordhay kadib markii lagu guulaysan waayay soosaarka galayda Guga 2004.

### Tusmada Isu-dheelitirka Dalagga Soomaaliya (Qiyaas ku salaysan xog taariikhi ah iyo xaalado)

Tusmada Isu-dheelitirka Dalagga ee beeraha sannadkan (June 2005- May 2006) wuxuu muujinayaa in xitaa marka uu soosaarka dalagga ee Gugu caadi ka hooseeyo, aanu dhinmi doonin dalagga Soomaaliya. Sanduuqa 1, wuxuu ka koobanyahay natiijooyinka 4 xaaladood oo ku salaysan saadaal kala duwan oo ah soosaarka dalagga Gu 2005: caadi, caadi ka hooseeya, caadi ka sarreeya iyo meelaha koonfurta ee caadi ka hooseeya. Tusmada Isu-dheelitirka Dalaggu waxay bixisaa muujin guud iyo qiyaas heer dhaqaale ah loo eegayo helitaanka dalagga iyo baahida qiyaasta dakhliga qofka ee guudahaaneed.


### Sanduuqa 1: Falanqaynta Xaaladda Tusmada Isu-dheelitirka Dalagga June 2005 ilaa May 2006

Tusmada Isu-dheelitirka Dalagga Soomaaliya ee Sannadkii (June 2005 ilaa May 2006)	Afar Xaaladood: Saadaasha Sannadkii			
	Celceliska Dagaalkii Kadib[1] ('000MT)	Soosaar caadi ka hooseeya Guga 2005[2] ('000 MT)	Soosaar caadi ka sarreeya Guga 2005[3] ('000 MT)	Koonfurta oo caadi ka hooseeya Guga 2005[4] ('000 MT)
<b>KAYDKA AY TAHAY IN DALKA GUDIHIISA LAGA HELO</b>	<b>306</b>	<b>233</b>	<b>393</b>	<b>278</b>
Kaydka lagu bilaabo ee sannadkii hore ka soo hadhay [5]	24	24	24	24
Saadka dalagga yaalla gudaha dalka 2004/05	282	209	369	254
Gu 2005[6]	178	105	265	150
Deyr 2005[7]	104	104	104	104
<b>DALAGGA LAGU ISTICMAALO GUDAHA DALKA</b>				
Baahida Dalagga la isticmaalo[8]	<b>640</b>	<b>633</b>	<b>649</b>	<b>637</b>
<b>BAAHIDA DALAGGA DIBEDDA LAGA KEENO</b>				
Ganacsiga la filayo in dibedda laga Kaydka Cuntada Gargaarka ah, Jidka ku soo jirta ama la qoondeeyey [10]	<b>395</b>	<b>395</b>	<b>395</b>	<b>395</b>
	12	12	12	12
<b>QIYAASTA DHEERAADKA AH - DALAGGA</b>	<b>73</b>	<b>7</b>	<b>151</b>	<b>48</b>

### Faallo ka bixinta Sanduuqa 1:

<sup>1</sup> Xogta taariikhiga ah ee FSAU 1995-2004. <sup>2</sup> Celceliska soosaarka xiliga Guga 3dii ugu hosseyey oo heer gobol ah. <sup>3</sup> Celceliska soosaarka xiliga Guga 3dii ugu sarreeyey oo heer gobol ah. <sup>4</sup> Celceliska Dagaalka Kadib ee dhammaan gobolada, laga reebo celceliska 3da soosaar ee xiliga Guga ugu hosseyey ee Jubba iyo Shabeelle. <sup>5</sup> Dalagga kaydka ah ee lagu bilaabay oo ka kooban cunto gargaar ah iyo kayd ah dalag ganacsi ah oo dibedda laga keenay oo yaalla dekadaha. Laga bilaabo May 29, 2005 kaydka WFP waa 6,075MT, CARE waa 1,540MT kaydka ganacsiga qiyaastii waa 16,000MT (FAO/WFP CSFM, Sept. '99). <sup>6</sup> Celceliska Dagaalka Kadib ee Deyrta, waxa ku jira dalag ka baxsan xilliga wax soosaarka caadiga ah. <sup>7</sup> Isticmaalka cuntada oo ku salaysan dadweynaha (WHO 2004) iyo qiyaasta dakhliga qofka ee isticmaalka dalagga oo ah 80kg/sannadkii (FAO/WFP CFSAM '99), dalaga cunto loo siiyo xoolaha iyo abuurka xumaada ama khasaara oo ku salaysan % qiyaasta soosaarka (FAO/WFP CFSAM '99). <sup>8</sup> Dalagga ganacsiga ah ee la filayo in dibedda laga keeno, oo laga reebo cuntada gargaarka ah. Qiyaasta waxa laga soo qaatay celcelis ah dalagga dibedda laga keenay 3 sannadood (2002-2004), dekadaha Berbera, Bosaaso, Ceel Macaan, iyo Jasiira (Waxa laga soo qaatay xogta maamullada dekedaha Berbera iyo Bosaaso iyo tirokoobka WFP ee dekadaha Ceel-Macaan iyo Jasiira). Qiyaasta dalagga dibedda laga keeno waa bariis, sarreen, daqiiq, baasto iyo tiro yar oo ah galay iyo hadhuudh. Xusuuso in qaar ka mid ah dalagga dibedda laga keeno ee mara dekadaha Berbera iyo Bosaaso in dib loogu dhoofiyo Itoobiya, laakiin ganacsigaas soohdinta ka gudba iyo dalagga dibedda laga keeno ee aan rasmiga ahayn ee mara dekadado yar yar oo xeebta galbeed ku yaalla lama diiwaangelyo ama lama hayo warkooda. <sup>10</sup> Laga bilaabo 29ka May 2005 WFP waxay warinaysaa in 4,260MT ay jidka ku soo jiraan iyo in 8,480MT la qoondeeyey. CARE mudadan waxaba ma warinaysa.

## Xoolaha



Roobabka Guga 2005 oo caadi ka sarreeya ayaa ka da'ay gobollada xooladhaqatada ee waqooyiga iyo kuwa dhexe (oo ka dambeeyey roobab fiican oo da'ay Derytii 2004/05). Roobabkaasi waxay ku wadaan inay hore u marinayaan xaaladda iyo soosaarka xoolaha. Qaar ka mid ah dhulka xooladhaqatada ee gobollada koonfurta iyo kuwa dhexe waxay heleen roobab kooban xiligan Guga, hase yeeshee, roobabkii Deyrta ee lagu guulaystay ayaa hubiyey inay jiraan biyo iyo daaq ku filani. Xaaladda Xooluhana waxa la sheegay inay guud ahaan fiicantahay.

Isku-dar dhan 155,391 oo neef oo adhi ah ayaa laga dhoofiyeed dekadaha Berbera iyo Bosaaso bishii May, tiraadaas oo xoogaa ka badan (9%) tii April (142,578 neef), lakiin waxay xoogaa ka hoosaysaa tiradii adhiga la dhoofiyeed sannadkii la soo dhaafay bishii May (161,970 oo neef).

beeraha - xoolaha

## Falanqaynta Dhamaystiran ee Hubinta Cuntada: Arrimaha Gobollada ee soo Shaac-baxaya

### Waqiyyi-Galbeed

Roobabka Gugu waxay ka sarreeyeen 300% celceliska heerka mudada dheer badi gobollada Awdal, Waqooyi Galbeed iyo Xeebta. Roobabkaasi waxay dib u cusboonaysiiyeen biyaha iyo daaqa, waxana ay hore u mariyeen xaaladda jidhka xoolaha. Dhulka xoolo-iyo-beero-dhaqatada ciidda oo qoyday, daadad iyo qiimaha cagafta oo sarreeyaa waxay dib u dhigeen howlaha diyaarinta dhulka. Hase yeeshee dalag fiicani inuu go'o ayaa la filayaa August/October.

### Waqiyyi-Dhexe iyo Waqooyi-Bari

Roobab caadi ka badan oo da'ay bishii May (150-290%) waxay kordhiyeen rajada laga qabo in seeraha iyo xoola-dhaqatadu ay dib oo soo kabtaan gobolladaas. Xaaladda jidhka xooluhu way fiicnaansaa heerka dhalmada xooluhuna wuu sarreeyaa. Waxa jira dad xaalufay oo loo baahanyahay in qiimayn lagu sameeyo awoodooda dib u soo kabashada. Toghdheer waxa ka da'ay roobab duufaan leh bishii May oo saqafka ka qaaday guryaha magaalada Caynaba, roobab aad u culusina waxay go'doomiyeen bulshooyinka waxana ay xidheen waddooyinka ganacsiga ee gobolka Sool. Colaadda Koonfurta Mudug way joogsatay, sidaas darteed ganacsiga ka dhexeeya waqooyibari iyo koonfurtu dib ayuu u bilaabmay. Eyl, Daangoryo, Garoowe iyo Jarriban hubin la'aan cuntada ah ayaa ka jirta iyagoo ka soo kabanaya abaaro isdabajooq ah, roobab qabow iyo Sunaami.

### Dhexe

Galgaduud waxa ka da'ay roobab caadi ah iyo kuwo caadi ka sarreeya (80-150%) oo kordhiyey helitaanka biyaha hoosna u dhigay qiimaha biyaha, horena u mariyey daaqa iyo xaaladda xoolaha. Heshiisiin colaadda qabiilka ah oo ay wadaan odayaashu waxay yaraysay xiisadda ka jirtay Hobyo iyo Xarardheere. Hase yeeshee, gaadiidku weli wuu xaddidanyahay. Heerarka nafaqa-darraduna aad ayay caadi uga sarreeyaan nabad la'aanta oo xayirtay helitaanka adeegyada aasaasiga ah darteed.

### Hiran


Daadad badan oo ka da'ay gobolka Hiran ayaa barakiciyey ama saameeyey qiyaastii 7,000 oo qoys. Qaybo ah magaalada Beled Weyne oo uu daadku qaaday dad ayaa ku barakacay. Daadku waxyeelo wuxuu gaadhsiiyey dalagga dhakhso lacagta looga helo, wuxuu burburiyey musqulo, waxana sumoobay ceelasha gacanta lagu qodo. Tuulooyin ku yaalla degmada Jalalaqi ayaa go'doomay maaddama waddooyinka waaweyn ee laamiga ah aan la mari karin. Waxa kalay qaseen hab-nololeedka iyo fursadaha shaqada beeraha iyo howlo kale. Colaad qabiil oo ka jirta Beled Weyne iyo aageedu waxay abuurtay dhibaatooyin gaadhida dhulkaas la xidhiidha.

### Gedo

Waqooyiga Gedo waxa ka da'ay roobab fiican, laakiin koonfurta roobabku way koobnaayeen taasina waxay si xun u taabatay rajada laga qabay soosaarka roobka ku baxa. Dabayaaqadii May, biyo badan oo ka yimi Itoobiya waxay keeneen in webigu ku fataho beeraha ku dhow oo uu xumaaday dalag ah qiyaastii 80-85%. Degmada Ceel-waaq biyuhu way yaraadeen roobabka Guga oo liitay iyo culayska ka yimi dadka dagaaladu ay barakiciyeen dartood. Colaaddu way ku korodhay degmooyinka Ceel-waaq, Garbahaarey iyo Buur-dhuubo. Heerarka nafaqa-darradu waxay ku wadaan inay caadi ka sarreeyaan.

### Shabeellooyinka

Galayda roobka ku baxda si fiican uma baxin waayo roobabkii Gugu ma fiicnayn. Roobab kooban ayaa ka da'ay dabayaaqadii May qaybo ah Shabeellada Hoose, laakiin waxtarka ay u leeyihiin horumarka dalagga su'aal ayaa ka taagan. Heerarka wabiga oo sarreeya waxay horseedeen in dhul dheeraad ah laga beero galayda la waraabiyo ee Dooxada Shabeelle taasoo ka hortagtay inay daadad soo rogmadaan. Inkasta oo awoodda ay wax ku iibsanayaan dadka saboolka ahi ay hoos u dhacday daynla'aan darteed, dalagga go'ay sannadkii 2004 wuu liitay, waxase jira howlo iyo dalag wadaag iyo shaqo maaliintii ah mana jirto hubin la'aan cuntada ah oo khatar ahi xiligana Guga.



### Jubbooyinka

Daadad badan oo ka dhacay Webiga Jubba (Koonfurta Gedo illaa Jamaame) laga billaabo badhtamihii May waxay keeneen inuu xumaaday qiyaastii 80-90% dalaggu. Goobaha qaar beeraha biyaa ka buuxsamay, waxana ay waxyeello gaadhay dhirtii khudradda cagaaran iyo beeraha muuska iyo babayga. Waxay u eegtahay soosaarka dalagga ee Guga 2005 inuu noqon doono mid ka mid ah kuwii ugu xumaa sannadahan. Dhammaan dhesheegga gobollada Jubba way buuxaan markii u horraysay ee taniyo fatahaaddii Elniino ee 1997, taasoo hore u marin doontaa fursadaha kalluumaysiga iyo khudradda dhulka hoostiisa ku jirta. Haddii abuurka la helana waxay keeni doontaa beeritaan dhulka biyo fadhiisinka ah. Saamaynta xun ee daadka ka timi waxa ka mid ah saadka cuntada oo xaddidan, qiimaha dalagga oo sii kordhaya tuulooyinka go'doomay iyo waddooyinka ganacsiga oo xidhmay, cudurrada biyaha ka dhasha oo kordhay iyo biyaha nadiifta ah oo yaraaday. Inkasta oo hay'aduhu ay gargaar sameeyeen haddana nafaqa-darrada carruurta waxay ku waddaa inay aad u sarraysay degmooyinkaas.

### Bay & Bakool

Roobabka Gugu caadi way ka hooseeyeen. In lagu guulaysto soosaarka hadhuudhku waxay ku xidhantahay inay da'aan roobab ku filani bishan June. Gobolka Bay, roobab ayaa ka da'ay dhulka xoola-dhaqatada oo hore u mariyey daaqa iyo xaaladda jidhka xoolaha. Gobolka Bakool dib u soo cusboonaanta daaqa wuxuu ku koobnaa Ceelberde iyo Raabdhure, muse badnayn Xuddur iyo Tiyeglow. Nabad la'aan sii kordhaysa oo ka jirta qaybo ah Bay iyo Bakool ayaa halis ku haysa hubinta cuntada iyo hab-nololeedka ee gobolkaas.

### FSAU Post Gu 2005 Food, Nutrition and Livelihood Security Assessment

FSAU waxay ka samayn doontaa Qiimaynta Guga 2005 Kadib dhammaan Soomaaliya July 5-25. Waxanu ku soo dhowaynaynaa hay'adaha aanu isbaahaysannaa inay ka soo qaybgalaan howsha qiimaynta ee gudaha dalka iyo falanqaynta. Qiimaynta Guga kadib ee caadiga ah waxa dheer, FSAU waxay ka samayn doontaa qiimayn cuntada iyo nafaqada gurmada ah Afar Goobood oo lagu tilmaamay "Goobaha Ugu Daran": 1. Goobaha Webiyada ee Jubba, 2. Waqooyiga Gedo, 3. Qaybo kamid ah Galgaduud iyo Mudug,, 4. Sool iyo Dooxada Nugaal

Shan "Goobood oo Walaac laga Qabo" oo kale ayaa la tilmaamay in laga sameeyo qiimayn tii hore ka wayn oo Guga Kadib ah: 1. Dhulka Xoolaha Dhaqatada ee Xeebta Awdal, 2. Hawdka Togdheer, 3. Qaybo ah Bari iyo Mudug, 4. Wabiga Shabeelle (Hiiraan illaa LShabeellada Hoose), iyo 5. Goobaha collaadu ay ka jirto ee Bay/Bakool/Gedo. Eeg Khariidadda kor ku xusan si aad u hesho sharax buuxa oo goobahaas ah.

**Warbixino:** Warbixinta Nafaqada Bishii ee FSAU, May 2005; Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, June 2005; Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET, June 2005, Wargeyska Daadadka ee FEWSNET-Soomaaliya/SWALIMS, May 2005; Wargeyska Ilaalada Roobka ee FEWSNET-Soomaaliya, May 2005

**Baadhitaanno:** Baadhitan ay OCHA hoggaaminayso oo ay hay'ado kala samaynayso qaybo ah Dooxada Jubba ayaa la qorshaynayaa inuu dhaco 16-26 June 2005



Technical and Managerial Support



Funding Agencies



Technical Partners



Save the Children UK